Barashada mamulka iyo ganacsiga

Madoonaysaa in aad la lahaatid xidhiidh dad farabadan marka aad shaqayneysid?
Madoonaysaa in aad shaqo aad doonatid kadib marka aad dhameysid wax barashadaada dusiga sare?
Madoonaysaa in aad heshid fursad ah in aad shaqeysid ama aad dibeda wax barasho u tagtid?
Madoonaysaa in aad lahaatid aqoon xirfadleh oo marwalba horumar iyo isbadal tiigsanaysa?
Madoonaysaa in aad mustaqbalka aad yeelatid shirkad adig aad leedahay?
Haddaba waxbarashadan ah maamulaka iyo ganacsiga waa mid adiga gaar ahaan kugu haboon.
Tacliintan ah maamulka iyo ganacsiga waxaad barandoontaa aqoon aad u sareysa oo ah habka wax iibiska,dalxiiska iyo adeega bulshada.Waxbarashadan waa mid aad u balaadhan,shaqo kastana baahi ween loogu qabo. Waxaad baran doontaa sida aad ula macaamili laheed dadka wax iibsanay una soo dhaween laheed, kuwaas oo baahiyo kala duwan qaba.Waxaa intaas dheer in aad kafikiridoontid su aalaha muhiimka ah ee u baahan in mar walba la ogsoonaado,waxayna la xidhiidhaan marwalba wax yeelooyinka ay gaadhsiinkaraan dabeecadaha iyo iyagoo marwalba wax cusb oo horumar sare leh sameeya.

Haddii aad dooneysid in aad ka shaqeeysid ganacsiga ama safarada, waxaad markaa aad gelidoontaa oo aad ka shaqeyn doontaa shaqooyin caalami ah.waxaa in taas dheer inaad luqado kale aad barandoontid, iyo in aad dabeecadaha dadka kale aad aqoon iyo fahan gaar ah u lahaan doontid, jeclaandoontidna dhaqamada kale ee kala duwan.Waxaa heli doontaa fursad aad u balaadhan oo ah mid shaqo ama mid wax barasho oo dibeda ah, kadib marka aad wax barashadaada dugsigasare ee ganacsiga iyo maamulka aad dhameysatid

In aad shaqeysid ama aad waxbarashadaada aad sii wadatid.

Haddii aad waxbarashadan ganacsiga iyo maamulka aad dooratid in aad baratid, shaqo toos ah waad doonan kartaa marka aad qalinjebisd waxbarashadan dugsiga sare.Shaqooyinka aad raadsankareysid wax ay ku xidhantahay hadba wax barashada aad dooratay, iyo waxa aad dhigatay.Waxaa aad hadaad doonto aad wax barosho aad ka dhigankartaa dugsiyada lagu barto xirfadaha kala duwan, ama jaamacadaha.
Waxaad suaalikareysaa oo aad kalatashankareysaa qofka u qaabilsan waxbarashooyinka dugsiyada sida(studie-och yrkesvägledare)waxaanad waydiin karaysaa tacliinta lagaaga baahanyahay haddii aad dooneysid in aad waxbarashadada aad sii wadatid ilaa iyo heer jaamacadeed.

Shaqooyinka aad helikareysid

Marka aad ka qalinjebisid wax barshadan ganacsiga iyo maamulka ah waxaad raad sankartaa shaqooyinka ah sida, shaqooinka wax iibiska, dukaanada, iyo shaqooyinka dalxiiska oo markaa ad noqonkartid sida hogaamiye dalxiiseyaasha,ama dalxiis hage.

Waxbarashadani waxa ay ka koobantahay

Waxbarashadan ganacsiga iyo maamulku waxa ay ka koobantahay casharo. Casharo qaarkood waa qasab in dhamaan ardayda dhiganayasa dugsiga sare ey qaatan casharadaas. Waxaa jira

laakin casharo kale oo ugaar ah ardayda dhiganaysa waxbarashadan ganacsiga iyo maamulka oo kaliya. Waxa intaa soo raaca in ay jiran casharo kale oo adiga kuu gaarnoqonkara, oo aad gooni u doorankartid.

Waxbarashadani waxa ay leedahay laba takhasusood oo kaladuwan.taas oo macnaheedu ay tahay ardayda dhamaan ku sugan dalkan iyo nawaaxigiisa waxa ay doorankaraan marba kii ay doonayaan ama xiiseynayaan in ay ku takhasusaan.waxaa laga yaabaa in meelo kale aad ka heshid waxbarashooyin kale, ku waas oo lagayaaba in ay adiga ay kugu haboon yihiin.Waxaad weydiinkareysaa qofka uqaabilsan waxbarashada dugsiyada(studie och yrkesvägledare)

Takhasuska guud waxa ka mid ah.

Ganacsiga iyo habladhaqanka- Waxa uu gaar u yahay adig, haddii aad dooneysid in aad ka shaqeysid dukaanada. Markaana aad xiiseyneysid in aad dukaanada wax ku iibisid.
Dalxiiska iyo safarada- Waxa uu gaar uu u yahay adiga,haddii aad dooneysid in aad ka shaqaysid xafiisyada tigidhada safarada lagu jaro ama haddii aad dooneysid inaad hogaamisidna dalxiiseyaasha, ama aad dooneysid inaad ka shaqeysid huteelada.

Xiidhiika suuqa shaqada

Marka aad ku jirtid wax barashadaada ah ganacsiga iyo maamulka waxaad xidhiidh aad la yeelandoontaa suuqa shaqada.Waxaad sameen doontaa 15 isbuuc oh dababar xirfadeed iyo mid aqoon kororsi ah. Tababarkaana waxaa kuu diridoona iskuulkaaga isaga oo markaas ay wada shaqayn ay kadhaxeyso iskulkaaga iyo goobaha shaqo ee u dhaw xaafada aad degen tahay. Waana habka ugu wanaagsan ee aad dad ku barankartid,xidhiidhna aad ku yeelankartid. Xidhiidhkaas oo aad markale aad kaga faa ideeysankartid haddii aad istiraahdid shaqo raadso mustaqbalka.Haddii aad dooneysid in aad tababar xirfadeed aad kusameysid dibada, waxaa markaas suurtogal ah in aad heshid fursadaas dibeda ah.

Mustaqbalka iyo shaqooyinka

Aad ayaa loogu baahanyaha shaqaale ka shaqeeya ganacsiga .Haddii aad dooneysid in aad kashaqeysid dukaanada ama wax iibiska, waxaa suurtoobi karta in aad si fudud aad u heshid shaqo marka aad qalinjabisid waxbarashadan ganacsiga iyo maamulka ah.laakinse waaxaa adkaan karta si aad shaqooyinka dalxiiska ama maamulka aad shaqo aad ugu heshid. shaqooyinka noocan oo kale ah ma badana, dad farabadan way xiiseenayaan in ay ka shaqeeyaan